

**CODSIGA DHAGEYSIGA CADAALADA GOBOLKA
 REQUEST FOR A STATE FAIR HEARING**

Buuxinta foomkaan waa ikhtiyaari. Macluumaad shaqsi ahaan lagu aqoonsan karo ee lagu aruuriyay foomkaan waxaa loo isticmaalaa in lagu aqoonsado dacwada iyo nidaamka codsigaaga kaliya.

Magaca – Xubinta		Taleefonka	Aqoonsiga # Medicaid
Ciwaanka Boostada		Barnaamijka <input type="checkbox"/> Family Care <input type="checkbox"/> Partnership <input type="checkbox"/> PACE	
Magaalada	Lambarka Boostada	Managed Care Organization (MCO) (Hay'ada Daryeelka La maamulay)	
Taariikhda Maanta		Taariikhda Ku Habboon ee Ficilka	
Racfaanka la xiriiro: <input type="checkbox"/> U qalmida <input type="checkbox"/> wadaagista kharashka <input type="checkbox"/> Ku badelka adeega/taageerada <input type="checkbox"/> qorshaha Daryeelka		Si kooban u qeex badelka adeege/taageerada:	

- Haa Maya 1. Miyaad ku xareysay racfaan adiga oo kaashanaya MCO's Grievance and Appeal Committee (Guddiga Cabashada iyo Racfaanka)?
- Haa Maya 2. Haddii aad ku jawaabto 'haa' su'aasha kowbaad (1), miyaad codsatay isla adeegyada la sii wadayo inta lagu jiro racfaankaaga ee MCO?
- Haa Maya 3. Haddii aad ku jawaabto 'haa' su'aasha kowbaad (1), miyaad ka hor muuqatay MCO's Grievance and Appeal Committee?
- Haa Maya 4. Haddii aad ku jawaabto 'haa' su'aasha sadexaad (3), miyaad ka heshay go'aan MCO's Grievance and Committee? (Fadlan ku lifaaq nuqulka go'aanka, haddii la heli karo.)

Sii wadida adeegyadaada inta lagu jiro racfaan ka dhimista, hakinta ama joojinta adeega
 Haddii aad heleysid faa'idooyin oo aad weydiisay dhageysi cadaalad ah ka hor inta aysan faa'idooyinkaaga isbadelin, waxaad joogteynta kartaa helida isla faa'idooyinka illaa go'aanka dhageysigaaga cadaalada ah la sameeyo. Haddii aad rabtid inaad joogteysid faa'idooyinkaaga inta lagu jiro dhageysiga, codsigaaga waa in boosto ama fakis lagu soo diraa **markaas ama ka hor taariiqda bilowga ee tallaabada loogu talagalay**. Haddii garsooraha go'aansado in go'aanka MCO uu sax ahaa, waxaad u baahan kartaa inaad dib u bixisid faa'idooyinka dheeraadka ah ee aad heshay inta u dhaxeyso waqtiga aad weydiisay dhageysigaaga cadaalada ah iyo waqtiga garsooraha sameeyo go'aan. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay sababayn karto culeys dhaqaale oo wayn, waxaa laga yaabaa inaan lagaa rabin inaad dib ubixiso kharashkan.

Sax sanduuqaan haddii aad jeclaan laheyd inaad codsatid isla adeegyada la sii wadayo inta lagu jiro racfaanka.

Nuqulka faylka kiiskaaga

Waxaad xaq u leedahay nuqul bilaash ah ee macluumaadka feelka dacwadaada ku jirto ee la xiriirto racfaankaaga. Macluumaad waxaa laga wadaa dukumenti, diiwaano, iyo qoraalada kale ee la xiriiro.

Tani waxaa ku jiro warbixin walboo cusub ama dheeraad ah ee MCO isku aruuriyaan inta lagu jiro racfaankaaga. Si aad u codsatid nuqulo la xiriir maamulaha daryeelkaaga ama takhasuska xubinta xaquuqaha.

SAXIIXA – Xubinta

Taariikhda la
saxiixay

Boosto ama fakis ku soo dir foomkaan **IYO** koobiga Ogeysiinta Go'aaminta Faa'idada Go'aanka lid ku ah ama warqada go'aanka ee ku:

Family Care Request for Fair Hearing
c/o Division of Hearings and Appeals
PO Box 7875
Madison WI 53707-7875
Fakiska: 608-264-9885

Hay'adaada Daryeelka La maamulay:

Waxay bixisaa gargaaro bilaash ah iyo adeegyo dadka naafada ah si ay si wax ku ool ah inoola xiriiraan, sida:

- Calaamada u qalanta turjumaanada luuqada
- Macluumaadka qoran oo qaabab kale (daabacaad waaweyn, dhageysi, qaababka korontada la geli karo, qaabab kale)

Waxay bixisaa adeegyo luuqadeed oo bilaash ah oo loogu talagalay dadka luuqadooda koowaad aysan ahayn Ingiriiska, sida:

- Turjubaanada u qalma
- Macluumaad ku qoran luuqadaha kale

Haddii aad u baahantahay adeegyadaan, fadlan la xiriir maamulaha daryeelkaaga ama takhasuska xaquuqaha xubinta.